



401 Fifth Avenue
Seattle, WA 98104



Bitfocus, Inc.

5940 S Rainbow Blvd Ste 400, #60866
Las Vegas, Nevada 89118-2507

Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta Warqada Macluumaadka Macamiilka

Muxuu yahay Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta?

HMIS waxay u taagantahay Nidaamka Macluumaadka Maareynta Guri la'aanta, waana mid loogu baahanyahay dhammaan barnaamijyada iyo wakaaladaha bixinaya adeegaha ah dakhliga-jaban iyo qoysaska guri la'aanta ah taageerada lacagta dowlada. HMIS waa nidaam xog midkaas oo kaydiya macluumaadka kusaabsan adeegaha guri la'aanta

Maxay tahay ujeeddada Nidaamka HMIS?

Ujeeddada HMIS waa in la wanaajijo adeega ku caawiya dadka guri la'aanta ah si ay u helaan guri, oona si fiican ugu helaan ageehan.

Maxay tahay sababta loo aruurinayo macluumaadka noocaan ah?

Xogta macamiilka waxaa laga isticmaali doonaa dhinaca degmada, gobolka, iyo mas'uuliinta dowlada si loogu sheego baahooyinka guri la'aanta si wanaagsan. Aruurinta macluumaadka aasaasiga ah ee gaarka ah (jinsiyada, taariikhda dhallashada, tirada qoyska, iwm.) ee kusaabsan adiga iyo xubnaha qoyskaaga waa mid looga baahanyahay dowlada iyo maalgelinta degmada middaas oo taageerta barnaamijkan.

Sidee Nidaamka HMIS iigu faa'ideynayaa, macamiilka?

Marka la aruuriyo macluumaadkan adiga kugu saabsan hal mar-waxaa lagaaga adeegi karaa dhinaca wakaalado kale ayada oo aan la sheegin dhammaan faah-faahinada (taariikhda dhallashada, lambarka dammaanada bulshada, cinwaankaaga u dambeeyay, iwm.) markale iyo markale. Haddii ay jirto sabab kaa dhigaysa bixinta magacaaga ama magaca xubno kale oo qoyskaaga katirsan in ay ku galinayso khatar (ama xubinka qoyskaaga) galinayso khatar, waxaad markaasi codsan kartaa in macluumaadkaaga AAN lala wadaagin wakaalado kale. Waxed xaq u leedahay in aad buriso wadaagista macluumaadkaaga wakhti kasta adiga oo si fudud u buuxiya foomka "Burinta Macamiilka Oggolaanshaha lagu Siidaynayo Macluumaadka". Foomka waxaa laga elida haya'ad walba oo qeybgalaysaa HMIS ama bogga King County: kingcounty.hmis.cc.

Sidoo kale, iyada oo la isticmaalayo macluumaadka aad siisay HMIS, adiga iyo howl wadeenkaaga kiiska ayaa ka wada shaqeeyn karaa sidii aad u aqoonsan laheyd guryaha iyo adeegyada aad u baahan tahay oo aad uga shaqeysaan sida aad u heli laheyd.

Yaa heli kara ama geli kara macluumaadkaaga?

Macluumaadkaaga HMIS ayaa lala wadaagi kara Haya'adaha Wada Hawlgalka si ay ugu gudbiaayn isku xiraha iyo meeleynta guryaha iyo adeegyada sida la-talinta, cuntada, kaalmada adeegga, iyo adeegyada kale. Dadka sameeya warbixinta iyo shaqaalah HMIS ayaa sidoo kale arki kara macluumaadkaaga. Waxaa jira heerar sharchiyeed oo adag oo loogu talogalay dadka geli kara ama heli kara macluumaadkaaga, waxaana lagu ilaaliyay barnaamij sireed iliktaroonig ah.

Maxay yihiin xuquuqahaaga sida macmiil ahaan?

Waxaa dhici karta in lagaaga baahdo in aad ka jawaabitid qaar kamid ah su'alaha ayada oo shardi u ah barnaamijka, laakiin waxaa jiri doona su'aalooyin kale oo aad dooran kartid in aadan ka jawaabin. Waxed xaq u leedahay in aad aragtid diiwaankaaga qoraalka oona saxdid macluumaadka aan saxda ahayn. Sidoo kale adiga waxaad xaq u leedahay in aad nuqul kasamaysato diiwaankaaga qoraalka. Sidoo kale anaga WELIGENA ma siin doono wax macluumaad ah (caafimaad, baahooyin caafimaad, caafimaadka maskaxda, rabshada guriga, iwm.) ee

adiga kugu saabsan qof ka baxsan ururka, AAN KA AHAYN HADDII AAD ADIGU NA SIISID OGGOLAANSHO, ama haddii loogu baahdo sharciga tooska codsi maxkamad ama amar maxkamad. Macluumaadka Shakhsii aahaan loo aqoonsado, sida magacyada iyo dhalashooyinka ayaa laga saari doona toddobo sano kaib markii laga diiwaangeliyo HMIS. Wuxaad heli doontaa adeegaha haddii aad oggolaatid iyo haddii aadan oggolaaninba in macluumaadkaaga aqoonsiga shakhsiyeed la geliyo gudaha HMIS.

Foomkan laguma samayn doono wax bedelaad ah aan ka ahayn haddii laga oggolaado dhinaca Guddiga Hagga HMIS.
Fadlan u dir codsiyada oo dhan wixii isbeddelo ah: kcsupport@bitfocus.com